

## **Suaashaan Waxaa Ka Soo Jawaabay Fadiilat Sheekh DR Cismaan Macalin Maxamud**

**FROM Umu Sufyaan**

**asalamu calaykum suaashaan waxay ku socotaa culimada**

waxaan marar badan aan aragnay alshabaab oo afka u duuban islamrkaasna salaad dukanayaan, ma banaantay in salaada dhexdeeda afka la duubto, maxaase keenay alshaab iney wajiga qarsadaan hadayba og yihiin iney xaq ku dagaalamayaan oo ale raali ka yahay culimada i weydiya

Jawaab: Culimadu waxay yiraahdeen waa makruuh in afka la daboosho marka la tukanayo. Waxaana ku soo arooray xadiith sheegaya in Rasuulku nabadgelyo iyo ammaani korkiisa ha ahaatee uu diiday in afka la daboosho salaadda dhexdeeda Abuudaawuud iyo ibnumaajah ayaa weriyay, waana xadiith sugan.

Imaam Maalik na wuxuu kitaabkiisa Muwadda'a kaga weriyay saalim oo ah wiilkii Cabdillaahi ibn cumar kana mid ahaa toddobadii nin ee fiqiga looga danbeeyay magaalada Madiina waqtigii Taabiciinta, saalim hadduu arko qof afku u daboolan yahay salaadda dhexdeeda uu si xooggan uga soo dhufan jiray waxa afka ugu duuban, isaga oo munkarki gacantiisa wax uga qabanaya.

Imaam Maalik wuxuu leeyahay ma wanaagsana in afka la daboosho salaadda dhexdeeda, haddaan salaad la tukanayna ma ahan dhaqan akhyaareed in afka la duubto. Sidaas waxaa yiri imaam Maalik.

Dadku wax xun ayay ka maleynayaan qofka wejiga duubta, oo waxay is leeyihiin tolow muxuu dhagar damacsan yahay

Culimada qaarna waxay ku sheegeen xikmada loo diiday in afka la daboosho salaadda dhexdeeda si aan loogu ekaannin nimanka dabcaabudka ah marka ay cibaadeysanayaan.

Waxaa kaloo lugu sheegay xikmadda loo diiday arrintaa doonis la doonayo in wejigu dhulka taabto.

Arrinta shabaabka ku saabsan ee aad weydiinayso haddey is hubaan in ay xaq ku taagan yihiin maxay wejiga u qarsanayaan, waxay ku fiicnaan lahayd in iyaga la weydiyo. Dadkuse waxaa muuqata in ay ka aaminsan yihiin in ay cabsiyi u geysay arrintaas.

[www.manhajonline.com](http://www.manhajonline.com)